# ULTRASOUNDKA QINJIRKA QOORTA (THYROID)

(Qinjirka Thyroid, Parathyroid ama Qoorta)

Thyroid Ultrasound (Thyroid, Parathyroid or Neck) - Somali

Bukaanka: ______________________________________________

Taariikhda Ballanka: ________________ Waqtiga Imaashada: ____________________ am/pm

Goobta: Waaxda Sawirka Baarista ee Kliinikada Mankato
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001

### Maxuu yahay Ultrasoundka Qinjirka Thyroid?

Ultrasoundka qinjirka thyroid wuxuu adeegsadaa hiirarka dhawaaqa, ma adeegsado shucaaca, iyo qalab lagu magacaabo "transducer si loo helo sawirada qinjirka thyroid. Qinjirka thyroid wuxuu ku yaal qeybta hoose qoorta.

### Baarista Ka Hor

- Ma jirto cunto kaa reeban xagga baaristaan.
- In aad soo daahdid waxay dhalin doontaa in ballan kale loo qabto baaristaada.

### Inta ay Socoto Baarista:

- Waxaa lagu weydiin doonaa in aad dharka iska dhigtid. Waxaa lagu siin doonaa goono.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aad ku seexatid sariir.
- Baaristaan waxay qaadan kartaa ilaa 30 daqiiqo si loo dhamaystiro.
- Waxaa lagaa codsan doonaa in aadan hadlin inta ay socoto baarista si loo helo sawiro sax ah.
- Burcad diiran ayaa la saari doonaa qoortaada.
- Qalabka "transducer" ayaa la marmari doonaa qoortaada inta ay socoto baarista.
- Qalabka dhawaaqa (sonographer) wuxuu qaadi doonaa dhowr sawir.
- Sawiradaada waxaa fiirin doono, waxaan akhrin doono aqoonyaanka qalabka shucaaca.
- Warbixinta saxixan ee ugu dambeyso waxaa loo diri doonaa bixiyaha dalbay baarista.

### Baarista Kaddib:

- Waxaad ku noqon kartaa cuntadaada caadiga haddii aan lagu siinin tilmaamo kale.

**Waa la fiirin doonaa baaristaada, waxaana akhrin doono aqoonyaanka Raajada 24ta saac xigta gudaheeda. Waxaa warbixin loo diri doonaa bixiyehaada si uu u fiiriyo. Bixiyehaada wuxuu mas'uul ka yahay in uu kuu soo gudbiyo natiijadaha, waxaana laguu soo diri doonaa warqad, telefoon, ama waxaa lagu siin doonaa ballan si laguula socdo. Haddii aan lagu siinin ballanka laguula socdo, aadna waxba ka maqlin muddo hal todobaad gudaheeda, waxaad xaq u leedahay in aad wacdid waaxda bixiyehaada una weydiisid natiijada.**

**Haddii aadan awoodin in aad xajisid ballankaada ama aad su'aalo ka qabtid baaristaada, fadlan wac 507-389-8570.**

**Fadlan iska xaadiri Diiwaan Gelinta Dhexe (Central Registration) ka hor inta aadan tagin Waaxda Sawirka Baarista.**

**MC1756SO (la baddalay 11.13)**